

Foomka Oggolaanshaha Racfaanka Dib-ugu-Celinta Fasalka Saddexaad

Iyadoo la raacayo Xeerka T.C.A. § 49-6-3115 iyo Xeerka Guddiga Waxbarashada ee Gobolka 0520-01-03-.16, waalid ama masuulka sharciga ah wuxuu siin karaa ogolaansho qoraal ah maamulaha dugsiga, lataliyaha dugsiga, macallinka, ama maamulka kale ee degmada dugsiga ama dugsiga cutubka dadweynaha si uu racfaan uga gudbiyo go'aanka lagu aqoonsaday ardayga in dib loogu dhigo fasalka 3aad, isagoo ku hadlaaya afka waalidka ama masuulka sharciga ah.

Degmada dugsiga ama dugsiga cutubka dadweynaha waa in si buuxda loogu wargeliyaan waalidka ama masuulka sharciga ah, [fursadaha ardayga u suurtagelinaysa inuu u gudbo fasalka afraad](#) kahor inta aanu waalidku ama masuulka sharciga ah saxiixin foomka ogolaanshaha. Waalidiintu waxay ka heli karaan maclummaad dheeraad ah oHanaanka Racfaanada Waalidka adigoo booqanaya bogga [Waxbarashada la Dedejiyay \(Learning Acceleration\)](#).

Saxiixaaga hoose wuxuu muujinayaa in aad tahay waalidka ama masuulka ardayga ee halista ugu jira in dib loogu celiyo fasalka saddexaad; in degmada dugsiga ilmahaaga ama dugsiga cutubka dadweynaha ay kugu wargeliyeen fursadaha ilmahaaga u suurtagelinaysa inuu u gudbo fasalka afraad; isla markaana aad oggolaansho u siineyso degmada dugsiga ama dugsiga cutubka dadweynaha inay racfaan ka gudbiyaan iyaga oo ku hadlaaya afkaaga.

Magaca Sharciga ah ee Ardayga

Magaca Waalidka

Lambarka Aqoonsiga Gobolka ee Ardayga

Magaca Dugsiga

Magaca Degmada Dugsiga ama Dugsiga Cutubka Dadweynaha

Saxiixa Waalidka/Masuulka